

Pacemaker/Defibrillator Placement: Transvenous
Garaacis-hagaajiye/Gelinta Qalabka Dhalinta Garaacista



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Gelinta Hagaajinta Garaacista Transvenous Pacemaker Placement

Garaacis-hagaajiyaha wadnaha waa qalab lagu rakibo wadnaha oo lagu xakameeyo garaaca wadnaha. Garaacis-hagaajiyaha waxa uu ka kooban yahay qalbaca sare (qeybta kore) iyo/ama qalbaca hoose (qeybta hoose) ee xididdada wadnaha iyo korontodhaliyaha (batteriga) waxaa la gelinayaa maqaarka ama muruqa darbiga xabadka hoostiisa. Garaacis-hagaajiyaha waxaa la geliyaa ilmaha loo arko in uu gaabinayo garaaca wadnahooda (wadnegaabis) ama marka aysan korontada qalbaca sare ee wadnaha (qalbaca) la xiriirin qalbacyada hoose ee wadnaha (qalbacyada), oo waxaa la yiraahdaa xannibaadda wadnaha. Waxa uu ilmuhu ku dhalan karaa wadne xanniban ama waxaa ku keeni kara sababo kale, sida qalliin. Garaacis-hagaajiyaha waxaa la gelinayaa xididdada marka bukaanku ilaa xadd weyn yahay oo uu leeyahay laba qalbac ee wadnaha, wax la mid ah wadne caadi ah.

Waa wax ku xiran qorshaha qalliinka, oo jeexitaan ayaa lagu sameynayaa xabadka dhanka bidix ee sare ee kaxanta. Cirbad ayaa la gelinayaa xididka kaxanta ee bukaanka iyo galal, la mid ah tuubbo faleebbe oo weyn, ayaa la gelinayaa. Sida la tilmaamay, xargaha garaacista waxaa la gelinayaa qeybta kore, qalbaca, ama labadaba oo ka hooseysa hagista sawirka (raajada) dhaqaaqeyso. Marka la geliyo, xargaha ayaa la tijaabinayaa si loo hubiyo garaacista saxa ah iyo si loo ogaado garaacista wadnaha ee ku habboon. “Jeeb” le’eg korontodhaliyaha garaacis-hagaajiyaha ayaa lagu sameynayaa goobta la jeexay. Marka la geliyo, garaacis-hagaajiyaha xargihiisa ayaa lagu dhejinayaa oo lagu xirayaa koronto-dhaliyaha, oo waxaa la gelinayaa “jeeb,” oo meeshii la jeexay ayaa la xirayaa.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 2 ilaa 3 saac
- Leymanka Caadiga: Carruurta waxa ay ku noqon doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka iyagoo uu ku xiran yahay faleebbeyasha bannaanka ah oo keliya.
- Sookabashada Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib: Waxa uu ilmuhu guud ahaan ku soo kaban doonaa PAR 4 ilaa uu feejignaado oo uu soo jeedo. Marka xaalku dego, waxaa lagu celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha si loogu hayo. Subaxdii marka la gaaro, raajo ayaa xabadka laga saarayaa si loo hubiyo goobta saxda ah ee xargaha garaacis-hagaajiyaha iyo qalabka ayaa ogaanayaa garaacista saxa ah. Haddii uu xaalku caadi yahay, markaas ilmaha waxaa loo dirayaa guriga
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Bukaanku wuxuu isbitaalka joogayaa badanaa hal habeen ka dib marka loo geliyo garaacis-hagaajiyaha wadnaha.

Qaashada Daawooyinka Guriga: Carruurta waxa ay u baahan karaan daawo in ay guriga u qaataan ka dib gelina garaacis-hagaajiyaha wadnaha sida:

- Daawada xanuunka (Oxycodone, Tylenol, Ibuprofen) ilaa dhowr maalmood qalliinka ka dib